

GOBOLKA WASHINGTON
XAFIISKA DACWAD DHAGEYSIGA MAAMULKA

Arrinka:

Magaca Racfaan-qaataha,

Racfaan-
qaataha.

Lambarka Aqoonsiga **Lambarka Kiiska**

OGEYSIISKA Nooca dacwad dhageysiga: (Notice of ...)

Hay'adda: Maamulka Daryeelka Caafimaadka
(Health Care Authority)

Barnaamijka: **Nooca Barnaamijka**
Lambarka Hay'adda

Maamulka Daryeelka Caafimaadka (Hay'adda) ama Xafiiska Dacwad Dhageysiga ee Maamulka (Office of Administrative Hearings, OAH) ayaa helay codsiga dacwad dhageysiga ee lifaaqan ku jira **TAARIIKHDA**.

DACWAD DHAGEYSIGAAGA WAXAA LA QABAN DOONAA:

TAARIIKHDA: **Taariikhda dacwad dhageysiga**

WAKHTIGA: **Wakhtiga dacwad dhageysiga** Wakhtiga Baasifigga

GOOBTA: Wicitaanka Shirka Taleefoonka Lagu Qabanaayo (eeg tilmaamaha hoose)

GARSOORAHA: **Magaca garsooraha**

Haddii adiga ama markhaati aad u baahan tihiin TARJUMAAN, waxaanu idunku siin doonaa mid si bilaash ah. Fadlan ka wac OAH lambarka (800) 583-8271 si aad u codsato turjubaan.

Haddii aysan ka ahayn in si ka duwan uu u amray Garsooraha Sharciga Maamulka (Administrative Law Judge, ALJ) mooyaane, waa in aad soo gudbisaa dhammaan dukumeentiyada ama dukumeentiyada taageerada ee aad rabto in Wakiilka Hay'adda iyo Garsooraha Sharciga Maamulka ay arkaan ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor dacwad dhageysiga. **Fadlan lifaaqa ka akhri macluumaadka ku saabsan noocyada dukumeentiyada taageerada ee la soo gudbin karo iyo xaddidaadaha cabbirka dukumeentiyada taageerada.** Waxaad waydiisan kartaa Wakiilka Hay'adda inuu kaa caawiyo inaad nuqul ka sameyso oo aadna siiso dukumentiyada dhinacyada kale, iyo Garsooraha Sharciga Maamulka ee OAH. Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 182-526-0370.

Sida looga qeybgalo **Dacwad dhageysiga:**

1. Wakhtiga Dacwad dhageysiga, wac **1-866-527-0393**.

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.

2. Marka ay kuu soo baxdo, geli **KOODHKA gelitaanka dacwad dhageysiga ee gaarka ah** kadibna raaci furaha #.
3. Adigu ma tihid Qabanqaabiyaha Kulanka sidaa darteed HA riixin furaha * haddii lagu sheego inaad sidaas samayso.
4. Hadda waxa lagugu meelayn doonaa hoolka ay ka dhaceysa dacwad dhagaysiga adiga oo sugaya garsooraha si uu u bilaabo dacwad dhagaysiga (waxa laga yaabaa in aad maqasho muusigada HOLD).
5. Xaqiiji in taleefankaagu leeyahay intarneet/khad wanaagsan, uu si kugu filan jaajar u leeyahay ugu yaraan saacad.
6. Xaqiiji inaad joogto meel degan halkaas oo si cad wax uga maqli karto oo si cadna lagu maqli karo.
7. Haddii ay dhibaato kaa qabsato ku soo biirista shirka taleefoonka ka dhacaya, ama haddii garsooruhu aanu ku soo biirin gudaha toban daqiiqo kadib wakhtiga bilaabashada ee Dacwad dhageysiga, isla markiiba ka wac OAH lambarka (800) 583-8271.
8. Haddii uu khadka kaa go'o, kaliya dib u soo wac (Tallaabada 1) oo isticmaal isla koodhka (Tallaabada 2).
9. Haddii ay dhibaato kaa haysato dib ugu soo xidhashada shirka taleefoonka ka dhacaya, isla markiiba soo wac (800) 583-8271 si aad caawimo u hesho.

Haddii aadan ku soo biirin shirka 15 daqiiqo gudahooda ka dib wakhtiga bilaabashada ee la qorsheeyay, garsooraha sharciga maamulka ayaa kugu meeleyn kara ku guuldareysiga gudashada waajibaadka habraaca dacwadeed oo wuxuuna iska diidi karaa racfaankaaga, taas oo macnaheedu yahay **inaad waayi karto xaq aad u leedahay dacwad dhagaysiga**. WAC 182-526-0284.

Waxaad xaq u leedahay in aad la qabsato dacwad dhageysi qof ahaan loo soo xaadiraayo garsooraha. Si aad codsigan u samayso, ka wac OAH lambarkan hoos ku qoran.

Wac Wakiilka Hay'adda sida ugu dhakhsaha badan haddii aad **u baahan** tahay inaad beddesho wakhtiga ama taariikhda dacwad dhageysigaaga. Garsooraha Sharciga Maamulka ayaa go'aamin doona haddii aad haysato sabab wanaagsan si loo beddelo wakhtiga ama taariikhda.

Waxa aad ku matali kartaa naftaada dacwad dhagaysiga ama waxa aad dooran kartaa looyar ama qof kale inuu ku matalo. Adiga ayaa mas'uul ka ah kharash kasta oo uu kugu dalaco qareenkaaga.

U sheeg OAH MARKIIBA hadii cinwaankaaga ama taleefan lambarkaaga isbeddel ku imaado. Waxaa laga yaabaa inaan u baahano inaan kuu soo dirno ogeysiisyo iyo boostooyin kale oo ku saabsan dacwad dhageysiga.

Haddii aad qabto naafonimo ama naafonimada xaga dareenka oo aad u baahan tahay wax sii qabanqaabin markaad isticmaalayso tas-hiilaadkayada ama adeegyadayada, fadlan la xidhiidh OAH.

Fadlan akhri Soo koobidda Xuquuqda Dacwad Dhagaysiga ee lifaaqa ku jira si aad wax uga ogaato xuquuqdaada, waxa ay tahay inaad keento, iyo sida dacwad dhagaysiyadu u shaqeeyaan. Hubka fudud iyo hubka kale ee halista ah waa ka mamnuuc goobta dacwad dhageysiga iyo dhammaan xafiisyada OAH.

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.

WAC 10-20-010. Haddii aad walaac ka qabto dacwad dhageysiga ama hordhaca dacwad dhageysiga, fadlan la xidhiidh OAH.

LAGU SIIYAY taariikhda boosto soo dhigista.

Ku lifaaqan: Codsiga Dacwad Dhageysiga
Soo koobidda Xuquuqda Dacwad Dhagaysiga

<u>SIDA LOOLA XIDHIIDHO OAH:</u> Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka PO Box 42489 Olympia, WA 98504 Telefoonka:(800) 583-8271	<u>SIDA LOOLA XIDHIIDHO</u> <u>WAKIILKA HAY'ADDA:</u> Magaca Wakiilka Hay'adda Ciwaanka Wakiilka Hay'adda
---	--

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.

SHAACINTA/CADDEEYNTA ADEEGGA (DECLARATION OF SERVICE)

Waxaan ku caddeenayaa sida hoos imaata ganaaxa been-abuurka ee hoos timaada shuruucda Gobolka Washington in maanta aan u gudbiyay dukumeentigan mid kasta oo ka mid ah dhinacyada hoos ku taxan. Waxaan koobi boostada ugu diray dhinacyada ciwaankoodu ku jiro diiwaanka anigoo isticmaalaya Adeegga Boostada ee Isku-dhafka ah, ama Boostada Mareykanka.

Liiska qof kasta oo loo soo diray Ogeysiiskan Dacwad Dhageysiga.

Ku taariikheysan Taariikhda marka Ogeysiiska Dacwad Dhageysiga boostada lagu soo diray goobta Magaalada, Washington.

(TAARIIKHDA BOOSTO KU DIRISTA)

Wakiilka

Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.